

Hormarinta Shaqaalaha



Ciladaha

Dadka dagan Oregon ayaa isbadalaaya. Dadka gobalka ayaa badanaaya waxayna sii noqonayaan kuwo kaladuwan. Si loo daboolo baahida kaladuwanaantaan sii kordhaysa, shaqaale bixin kara adeegyada ku haboon dhaqanka iyo luuqada ayaa loo baahan yahay. Arrintaan ayaa si gaar ah muhiim ugu ah dadka baxsha caafimaadka iyo adeegyada aadanaha.

Xeerarka, sharciyada iyo tababarada muujinaaysa isbadaladaan ayaa gacan ka gaysan kara abuurista shaqale leh farsamo fiican oo ay ku buuxshaan baahiyaha bulshooyinka gobalka — si gaar ahna bulshooyinak Madoowga, Dhaladka, dadka aan cadaan ahayn iyo Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska.

Dadka ku nool aagaga miyiga ama la nool naafada, fursadaha dhaqaalaha ayaa aad ugu yar. Si loo aburo fursadaha shaqada oo sinaan badan leh, Healthier Together Oregon (HTO) waxay doonaysaa xal u helida caqabadaha iyo samaynta waxbarashada sare iyo shaqooyin leh dookhyada mushaar badan oo ay helaan dhammaan dadka Oregon.

Xalalka

Xeelado lagu abuurayo laguna joogtaynaayo shaqaale fahmaaya luuqada iyo dhaqanka ayna ku jiraan:

- In qasab laga dhigo tababarka dookha galmada iyo aqoonsiga jinsiga ee dhammaan shaqaalaha caafimaadka iyo adeegga bulshada
- In la dhaqan gasho heerarka hormarinta shaqaalaha oo xal u helaaya eexda korna u qaadaaya bixinta adeegyo loo siman yahay, baxnaaninaaya dhimirka kuna haboon dhaqanka iyo luuqada
- In la taageero qaababka kale ee bixinta adeegyada caafimaadka deegaannada miyiga ah

HTO waxay doonaysaa inay balaariso farsamooyinka khayraadka dadka iyo heerarka hormarinta shaqaalaha oo xal u helaaya eexda korna u qaadaaya sinaanta.

HTO waxay taageeraysaa xeeladaha shaqaalaha oo xal u noqonaaya dhakhaatiir yarida ka jirta deegaannada miyiga ah waxayna xal u helaysaa baahida loo qabo adeeg bixiyaal fahmaaya luuqada iyo dhaqanka dadka ay u adeegayaan. Arrintaan waxay ka dhigan tahay tababarida adeeg bixiyaasha hadda shaqeeya si loo yareeyo eexda ayna u fahmaan daryeelka baxnaaninaaya uur kutaalooyinka sidoo kalana la taageero balaarinta shaqaalaha caadiga ah ee caafimaadka. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee ka yimaada bulshadooda ayaa aburi kara iskuxir muhiim ah oo dadka ku xiraaya adeegga korna u qaadaaya tayada daryeelka gobalka.



HTO: Qorshaha Dhisida Oregon intaan Ka fiican

Healthier Together Oregon (HTO) waa farsamo awood badan oo lagu hormarinaayo sinaanta dhammaan dadka Oregon. Ayadoo COVID-19 uu wax badan kala cadeeyay, maaha in qof kasta helay fursad iskumid ah oo uu ku noolaado nolol caafimaad leh. Dadka aan cadaanka ahayn, dadka danyarta ah, dadka ktirsan bulshada LGBTQ+ (qaniisiinta), dadka soo galootiga ah iyo qaxootiyaasha, dadka naafada ah iyo dadka ku nool deegaannada miyiga ah ee gobalka ayaa waajahaaya caqabado badan sabab la xariirta cadaalad daro ka jirta qaab dhismeedka bulsho iyo midka dhisme taasoo saamayn ku leh caafimaadka.

Sababa la xariirta in caafimaadka iyo fayaqabku ku tiirsan yihiin arimo kaladuwan, HTO ayaa dejisay taxaneyaalka badan oo xeelado ah kuwaasoo, marka la xaliyo si guudna loo dhaqan gasho, hormarin muuqat ku samayn kara noloshu qof kasta oo gobalkaan dagan.

HTO waxay doonaysaa inay dejiso Qorsheyaasha Hormarinta Caafimaadka Bulshada iyo sidoo kale muhiimadaha wakaaladaha iyo ururada, barnaamijyada iyo maalgashiyada. Waxay doonaysaa iskaashato kaladuwan oo ka shaqeeya

laamaha kaladuwan oo wadaagaaya dedaal lagu dhaqan gelinaayo yoolalkaan waawayn. Waaxahaan waxaa kamid ah daryeelka caafimaadka, saraakiisha la doortay, loo shaqeeyaasha, tabarucaada, gaadiidka, isticmaalka dhulka iyo qorshaynta, caafimaadka gobalka, qabiilka iyo kan dadwaynaha ee maxaliga ah, cadaalada danbiyada iyo fulinta sharciga, ururada bulshada, ururada ku salaysan diinta, adeeg bixiyaasha guriyaynta iyo aadanaha iyo waxbarashada.



Nala samee Iskaashi

HTO waxay doonaysaa inay xariir la samayso qolyaha kale ee u taagan inay hormariyaan sinaanta ka jirta Oregon. Si aad u hesho xog dheeraad ah ama nagalaso xariir:



WEBSSETKA

healthiertogetheroregon.org



IIMEELKA

publichealth.policy@state.or.us



NOQO ISKAASHADE

healthiertogetheroregon.org/potential-partner



YOUTUBE

bit.ly/3jvkuAE



Healthier Together Oregon

healthiertogetheroregon.org

Waa mashruuc ay fulinayso
Oregon Health Authority
(Maamulka Caafimaadka ee Oregon)